

Waaxda Adeegyada Qoyska ee Deegaanka Fairfax

# Isku-Filnaansho



Caawimo loogu tala-galay adiga, qoyskaaga, deriskaaga, bulshadaada.

Waxay bixisa adeegyo shaqaaleyn iyo kaalmo dad-weyne si ay uga caawinto shakhsiyaadka iyo qoysaska inay u noqdaan kuwo isku-filan isla markaana hela nolol qoys oo deggan.

## **Adeegyada Shaqaaleynta**

Adeegyada dadka shaqo-raadiska ah waxa ka mid ah maamulidda arrinka, qiimeynta mihno, adeegyo taageerid ah, iyo helidda tababar shaqo. Kooxda Adeegyada Ganacsiga waxay la shaqeeyaan loo-shaqeeyaasha si ay isku-dubbaridaan bandhigyo shaqo iyo Carwo Shaqo (Career Expo) ee sannad walba.

## **Kaalmada Ku Meel Gaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF)**

Wuxuu bixiyaa lacag ku meel gaar ah looguna tala-galay qoysaska dakhliga-yar oo leh caruur ka yar da' da 18 sano.

## **Qorshaha Virginia ee Shaqaaleynta aan ahayn Daryeel-Lacageed (VIEW)**

Wuxuu ka caawiyaa waalidiinta qaata TANF si ay ugu diyaargaroobaan bilaabidda, ku guuleysiga iyo dallacaad helidda

## **Barnaamijka Kaararka Cuntada**

Wuxuu siiyaa shakhsiyaadka iyo qoysaska dakhliga-yar kaar ka caawiya inay cunto ka iibsadaan tukaanada deegaanka.

## **Barnaamijka Medicaid ama FAMIS-Plus**

Wuxuu ka caawiyaa daryeelka caafimaad dadka waayeelka ee dakhliga-yar, dadka indha la' iyo kuwa naafonnimo qaba; dumarka uurka leh; caruurt baahida qaba iyo daryeelayaashood; iyo qaxootiga ay markii ugu horeysa soo galidda Mareykanka.

## **Barnaamijka Galaangalka Qoysku ay u leeyihiin Qorshaha Nabadsugidda Caymiska Caafimaadka (FAMIS)**

Waa caymis caafimaad oo loogu tala-galay caruurta qoysaska aan haysanin caymis caafimaad kale oo dakhligoodu, haba iska yaraadee, uu ka badan yahay dakhliga sharadka u ah Medicaid/FAMIS-Plus.

## **Barnaamijka Kaalmada Quwadda**

Wuxuu ka caawiyaa qoysaska dakhliga-yar bixinta biilashooda ee kululaynta iyo qaboojinta .

## **Barnaamijka Gargaarka Guud**

Wuxuu bil walba siiyaa jeeg dadka dakhliga-yar, oo muddo go'an naafonnimo ku dhacday, iyo caruurta baahan oo la nool dad qaraabooda ahayn.

## **GOOBAHEENNA**

### **Fairfax**

Dhismaha Pennino  
12011 Government Center  
Parkway  
Fairfax, VA 22035  
703-324-7500; TTY 703-222-9452

### **Falls Church**

Xarunta Adeegyada Insaanka  
6245 Leesburg Pike  
Falls Church, VA 22044  
703-533-5300; TTY 703-533-5316

### **Reston**

Dhismaha Xafiiska Lake Anne Offi  
11484 Washington Plaza West  
Reston, VA 20190  
703-787-4900; TTY 703-707-9346

### **Richmond Highway / Degmada Alexandria**

South County Government  
Center (Xarunta Dawladda ee  
Koonfurta Deegaanka)  
8350 Richmond Highway  
Alexandria, VA 22309  
703-704-6353; TTY 703-799-3435

[www.fairfaxcounty.gov/dfs](http://www.fairfaxcounty.gov/dfs)



Daabacaadan waxa soo saaray Deegaanka Fairfax, Virginia Deegaanka Fairfax waxa u go'id ah inayn jirin takoorid ku salaaysan laxaad la'aan dhamaan barnaamijyada, adeegyada iyo wax-qabadyada. Tix-gelin macquul ah baa lagu siin doona haddaad codsatid. Si aad u codsatid macluumaad oo hab kale ah, waac 703-324-5870; TTY 703-222-9452.

